



Dhibanayaasha Dagaal Qoyska Dhex Mara, Qashqashaadda, ama Fal Dambiyeedka La Xiriira Galmoodka: Xaqa Aad U Leedahay In Aad Ka Baxdo Heshiiska Kirada

Victims of Domestic Violence, Harassment, or Criminal Sexual Conduct: Your Rights in Breaking Your Lease

Haddii aadan heysan nabadgelyo dagaal qoyska dhex mara dartiis la xiriir:

Day One Services - wac 1(866) 223-1111 ama fariin u dir (612) 399-9995

Ama soo booqo www.dayoneservices.org ama www.MNcasa.org

Haddii aadan heysan nabadgelyo dagaal galmoodka la xiriira dartiis wac:

1 (800) 656-4673

Ma ka bixi karaa heshiiska liiska guriga aan ku deganahay haddii aan ahayn dhibane dambi laga galay?

Qof kasta oo kireyste ah oo ka badbaada xadgudub, qashqashaad, ama fal dambiyeed la xiriira galmoodka oo aan deganeyn guryaha kirada laga taageero waa uu burin karaa heshiiska kirada si uu u badbaado. Waxaa jira talaabooyin la doonayo in aad raacdo. **Talaabo waa in loo qaadaa dariiqa saxa ah haddii aad dooneyso in aad ka baxdo heshiiska kirada:**

Fiiro gaar ah: Haddii aa degan tahay:

- Guryaha dadweynaha
 - Guryaha kirada laga taageero
 - Guryaha baadiyaha ee USDA
 - Guryaha Dadka Dakhligoodu Yar Yahay ee canshuur dhaafka loo sameeyo (Section 42)
- AMA**
- aad heysato foojarka Section 8



waxaa jira sharciyo kale oo kuwa dawladda dhexe ah oo ilaalinaya xuquuqda dadka ka badbaada dagaalka qoyska dhex mara iyo rabshadaha galmoodka. Waad ka bixi kartaa heshiiska kirada ee guryaha kirada laga taageero.

waxa kale oo aad leedahay xuquuq dheeraad ah oo sharciga Minnesota oo lagu faahfaahiyey warqadda xogta urursan.


Haddii aad degan tahay guryaha barnaamijka taageerada kirada, akhri xogta urursan [Xuquuqda Dhibanayaasha Dagaalka Qoyska Dhex Mara Iyo Xadgudubka Galmoodka](#) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah **ka hor** inta aadan ka bixin heshiiska kirada.

Fiiro Gaar ah: talaabooyinka lagaa doonayo in aad qaado way ka duwan tahay kuwa barnaamijyada guriyeynta ee kale. La xiriir u doodaha dagaalka qoyska dhex mara ama hay'addaha adeegga sharciyada si ay kuu caawiyaan.

Talaabada 1aad: Qoraal ka samee

La imoow **HAL** mid ka mid ah qoraalada soo socda haddii aad dooneyso in aad ka baxdo heshiiska kirada. **Waxa lagaa doonayaa 1 kaliya.**

- **Amarka kala badbaadinta (OFP)**
AMA
- **Amar Kala Fogeynta**
AMA
- **Amarka Kala Fogeynta ee Dagaalka Qoyska Dhex Mara**
AMA
- **Qoraal uu saxiixay mid ka mid ah saraakiisha maxkamadda.** Saraakiisha maxkamadda waxaa ka mid noqon kara qaali, garsoore, maamulaha maxkamadda, ama sarkaalka kor kala socoshada. Waxa ay noqon kartaa, warqad ay soo qoreen kor kala socoshada, ama xeer ilaalinta. Waxa ay cadeyn kartaa in aad tahay dhibane loo geystay xad gudubka qoyska, qashqashaad, ama faldambiyeedka galmoodka. Waa in ay cadeysaa magaca qofka dhibka geysanaya haddii aad garaneyso OO amaankaagu ku jiro in aad bixiso.
AMA
- **Qoraal uu saxiixay xeer ilaalinta magaalada, gobolka ama hay'adaha sharciga ee qabiilka** oo ay ku cadahay in aad tahay dhibane dagaal qoyska dhex mara, qashqashaadda ama dambiyada la xiriira galmoodka. Waxa ay noqon kartaa warbixinta booliska, warbixinta baaritaanka ama qoraal oo ay saxiixeen hay'adaha nabadgelyada. Waa in ay cadeysaa magaca qofka dhibka geysanaya haddii aad garaneyso OO amaankaagu ku jiro in aad bixiso.
AMA
- Qoraal ay soo saareen **“koox sadexaad oo awood u leh”**. Koox sadexaad oo awood u leh waa:
 - Xirfadlayaasha caafimaadka oo cadeyn kara in aad tahay dhibane dagaal dhib ka soo gaaray (sida dhakhtar ama kalkaaliye caafimaad)
 - La taliyaha dagaalka la xiriira galmoodka oo ka shaqeeya xarumaha gurmada oo aqoon u leh u gurmada dhibanayaasha.
 - U doodaha dhibanayasha dagaalka qoyska dhex mara oo ka shaqeeya hoyga dumarka lagu xad gudbo ama barnaamijyada dagaalka qoyska dhex mara oo laga heli karo macluumaadka, u doodayaasha, gurmada, hoyga degdegga ah, ama taageerada dhibanayaasha dagaalka qoyska dhex mara.



Waxa aad adeegsan kartaa foomka halkan ku lifaaqan ee xogta urursan ee lagu magacaabo “Odhaahda Koox Sadexaad Oo Awood U Leh”.

Fiiro gaar ah: Haddii ay qoraaladan ku jiraan macluumaad aadan dooneyn in ay dadka kale arkaan waad “qarin” kartaa adiga oo khad madoow ku tirtira. Waxa aad marin kartaa qalin ama xabag cad si aanay dadka kale u arag.

Tusaale ahaan, waxa aad qarin kartaa macluumaadka la xiriira xadgudubka ilmaha loo geysto. Waxa aad qarin kartaa macluumaadkaas marba haddii qoraalku cadeynayo in adiga ama qof kula nool aad tihin dhibanayaasha dagaalka qoyska dhex mara, qashqashaad ama xadgudubka galmoodka.

Talaabada 2aad: Ogeysiis Qoraal Ah U Qor Kireeyaha

Waa in aad kireeyaha siisaa ogeysiis **qoraal** ah. Waxa aad isticmaali kartaa “Ogeysiiska Ka Bixidda Heshiiska Kirada” ee halkan ku lifaaqan. Haddii aad diyaariso ogeysiis aad adigu qorto waa in ay ku **cadahay**:



- Adiga ama qof guriga kugula nool aad dareemeysaan cabsi aad qof kale ka cabsaneysaan.
- Aad dooneyso in aad ka baxdo heshiiska kirada.
- Taariikhda aad dooneyso in aad guurto. Lama DOONAYO in aad bixiso 30 ama 60 maalmood oo ogeysiis ah. Taariikhda aad dooneyso in aad guurto.
- Waxyaabaha aad dooneyso in kireeyuhu ka yeelo alaabada aad guriga uga tagto.
- Halkan waxaa ku lifaaqan qoraalka talaabada 1aad ee ogeysiiska qoraalka ah.

Heyso nuqul ka mid ah ogeysiiska qoraalka ah ee aad u dirto kireeyaha.

Talaabada 3aad: Bixi Kirada ama Guur

Waa in aad bixisaa kirada oo dhan bilaha aadan degan tahay guriga. Tusaale ahaa, haddii aad ogeysiiska gaarsiiso kireeyaha 2da Agoosto oo aad dooneyso in aad guurto 15ka Agoosto, weli waa in aad bixisaa dhamaan kirada Agoosto marka la gaaro xilligeeda.

Heyso cadeynta muujineysa in aad bixisay kirada. Haddii aad lacag cadaan ah ku bixiso ka qaado lacag qabasho. Haddii aad ku bixiso jeegga lacagta, ka sameyso nuqul ama sawir ka qaad marka aad ku qorto magaca kireeyaha oo heyso lacag qabashada muujineysa in aad siisay kireeyaha.

Guur taariikhda aad ogeysiiska ugu qortay kireeyaha oo furaha u celi kireeyaha.

Haddii aad raacdo mid kasta oo ka mid ah 3da talaabo ee kore heshiiska kirada waxa uu ku egyahay taariikhda aad ka guurto guriga mas'uulna kama tihid bilaha ka haray heshiiska kirada.

LAAKIIN, haddii aadan u sameyn sida sharcigu ku farayo, waxa aad mas'uul ka noqon kartaa inta ka hartay heshiiska korada.

Fiiro gaar ah: Xitaa haddii aad ka baxdo heshiiska kirada oo aad raacdo 3da talaabo ee kor ku xusan weli waxa aad mas'uul ka tahay lacagta uu kugu lahaa kireeyaha ka hor inta aadan gaarsiin ogeysiiska.



MUHIM: Haddii aad ka baxdo heshiiska kirada adiga oo raacaya 3da talaabo ee kor ku xusan oo kireeyuhu kaala haro keydka ee Kirada (deposit), **lagaama** doonayo in aad sameyso waxyaabo dheeraad ah waadna guuri kartaa.

Maxaan yeelayaa haddii ay deganayaal kale ku jiraan heshiiska kirada?

Haddii ay jiraan dad kale oo kugula qoran heshiiska kirada, heshiiskooda kirada waxa uu dhamaanayaa taariikhda aad guurto. Tusaale ahaan, haddii aad ogeysiiska ku qorto in aad guureyso 13ka Maajo (May), dadka kale ee kugula qoran heshiiskooda kirada waxa uu ku egyahay 31ka Maajo. Waxaa lagaa doonayaa in ay guuraan taariikhdaas ama ay heshiis cusub la gaaraan kireeyaha. Waxaa laga yaabaa in lacag keyd ah oo cusub laga qaado heshiiska cusub ee ay la galaan kireeyaha.

Kireeyuhu malawadaagi karaa macluumaadkeyga dadka kale?

Kireeyuhu **uma** sheegi karo cidna in ay tahay dhibanae rabashad loo geystay ama ma siin karo cidna macluumaadka ogeysiiska qoraalka ah ama qoraalada la socda adiga ii aan siin ogolaasho qoraal ah. Marka kaliya ee macluumaadkaaga uu dad kale la wadaagi karo kireeyaha waa haddii macluumaadka u gudbinayo maxkamadda si u guriga qof uga saaro ama loo soo celiyo lacagta kirada ee aan la bixin ama burbur loo geystay guriga.



Mulkiiluhu ma igu khasbi karaa inaan sheego magaca qofka xadgudubka ii geystay?

Maya. Kireeyaha wuu ku weydiin karaa magaca qofka kuu geystay xadgudubyada ama qofka gurigaaga ka tirsan, laakiin kireeyaha kuguma khasbi karo in aad u sheegto. Waajib kuguma aha in aad u sheegto haddii aad u aragto in aysan badbaadadaada dan u aheyn ama haddii aadan garenyn qofka magaciisa. Weli waad ka bixi kartaa heshiiska kirada sida uu dhigayo sharcigan haddii aad inta kale sameyso.

Kireeyaha ma igu khasbi karaa inaan ka haro xuquuqdaad ama aan saxiixo qoraal aan kaga harayo xuquuqdaas?

Maya. Kireeyaha kuguma khasbi karo in aad ka harto xuquuqda ku xusan xogtan urursan. Taasi waxa ay ka dhigan tahay heshiis kasta oo dhex mara adiga iyo kireeyaha oo aan sharciga waafaqsaneyn, waa sharci daro. Xitaa haddii ay ku xusan tahay heshiiska kirada.

Kireeyaha ma igu khasbi karaa in aan bixiyo wax ka badan kirada bisha aan guurayo iyo in aan ka haro keydka kirada (deposit)?

Maya. haddii aad qaado talaabooyinka ku xusan xogta urursan mas'uuliyadda kaa saran kireystaha waa dhamaatay. Waajib kuguma aha in aad bixiso lacag dheeraad ah si aad amaan u hesho.

Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddii ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.

Notice to end lease due to fear of violence (Minn. Stat. § 504B.206)

Ogeysiiska Ka Bixidda Heshiiska Kirada Oo Ugu Wacan tahay Cabsi (sida uu dhigayo sharciga Minn. § 504B.206)

Date (Taariikh): _____

Dear Landlord (Kireeyaha Sharafta Leh):

(Minnesota law (Minn. Stat.) § 504B.206) lets me break my lease because I, or another person authorized to live in my home, fear imminent violence because of an incident of domestic abuse, harassment, or criminal sexual conduct. This is my notice that I am breaking my lease because of fear that I or another person authorized to live in my home will become the victim of domestic or sexual violence again if I do not move.

Sharciga Minnesota § 504B.206) waxa uu ii ogolaanayaa inaan ka bixi karo heshiiska kirada waayo Aniga oo ah, ama qof kale oo wakiilka aan ka ahay ee ku nool gurigeyga, na soo wajahay cabsi degdeg ah oo ay ugu wacan tahay dagaal qoyska dhex mara, xadgudub, qashqashaad, ama faldambiyeed la xiriira galmoodka. Kani waa ogeysiiska aan kugu wargelinayo in aan jabinayo heshiiska kirada waayo cabsida na soo wajahday aniga iyo dadka aan wakiilka ka ahay aanu nahay dhibanayaal dagaalka qoyska dhex mara ama fal dambiyeed galmoodka la xiriira haddii aanan guurin.

I will move out on (Waxa aan guurayaa): _____.

(Date –this may be any date before the end of your lease)

(Taariikhda - waxa ay noqon kartaa taariikh kasta oo ka horeysa dhamadka heshiiska kirada)

I am attaching a copy of the (check one):

Waxaa halkan ku lifaaqan nuqulka (koobi) (mid ka dooro):

- ☐ Order for Protection (OFP)
<Amarka kala badbaadinta (OFP) >
- ☐ No Contact Order
<Amarka kala fogeynta>
- ☐ Domestic Abuse No Contact Order (DANCO)
(Amarka Kala Fogeynta ee Dagaalka Qoyska Dhex Mara (DANCO):
- ☐ Documentation from a Court Official or Law Enforcement Official
(Qoraal ka soo baxay maxkamadda ama ciidanka nabadgelyada)
- ☐ Documentation from a qualified third party-- licensed health care professional, domestic abuse advocate, or sexual assault counselor
(Qoraal ay qoreen koox sadexaad -- xirfadlayaasha caafimaadka, u doodadaha dagaalka qoyska dhex mara, ama la taliyaha xadgudubka galmoodka.

If any of my property is left behind after I move (*check one*):

(Haddii ay jiraan waxyaabo aan ugu tago guriga ka dib marka aan guuro (mid ka dooro):

☐ You may get rid of my property right away
(waad fogeyn kartaa markiiba)

☐ Please store my property for 28 days and I will be responsible under the MN law 504B.271 for storage fees.
(Fadlan bakhaar ku xaree aniga ayaana mas'uul ka ah kharashka sida uu dhigayo sharciga MN law 504B.271):

I understand that my security deposit will not be returned to me in exchange for me being able to break my lease early due to imminent fear.

(Waxa aan fahamsanahay in keydka kirada aanu ii soo noqoneyn taaso ay ugu wacan tahay in aan ka baxay heshiiska kirada xilli hore cabsi degdeg ah oo ila soo deristay darteed):

I request that you do not give the information in this letter or the attached document to anyone, especially not my abuser, as required by Minn. Stat. § 504B.206.

(Waxa aan kaa codsanayaa in aadan cidna la wadaagin macluumaadka ku xusan warqaddan ama kuwa ku lifaaqan, gaar ahaan qofka ii geystay xadgudubka sida uu waajibka ka dhigayo sharciga § 504B.206.)

Signed (*Saxiix*): _____

Printed Name (*Magaca Oo Sadexan*): _____

[Keep a copy of this letter and the document you attached for your records]

[Nuqul ka reebo warqadda iyo qoraalada ku lifaaqan oo meel dhigo]

Statement by qualified third party (Minn. Stat. § 504B.206)

(Qoraal ka soo baxay koox sadexaad (Sharciga Minn § 504B.206)

I, _____ *(name of qualified third party)*, do

hereby verify as follows:

(Aniga oo ah, _____ (magac kooxda sadexaad) waxa aan halkan ku cadeynayaa sida soo socota):

1. I am a licensed health care professional, domestic abuse advocate, as that term is defined in Minn. Stat. § 595.02, subdivision 1, paragraph (l), or sexual assault counselor, as that term is defined in Minn. Stat. § 595.02, subdivision 1, paragraph (k), who has had in-person contact with

_____.
(name of victim(s))

1. *(Waxa aan aahay xirfadle heysta leesinka, u doode dagaalka qoyska dhex mara, sida lagu qeexay Sharciga Minn. § 595.02, qeybta 1, faqrada (l), ama la taliyaha xadgudubka galmoodka, sida lagu qeexay Sharciga Minn. § 595.02, qeybta 1, faqrada (k), oo xiriir toos ah la lahaa _____ (Magaca qofka dhibanaha ah (dhibanayaasha)).*

2. I have a reasonable basis to believe _____ *(name of victim(s))* is a victim/are victims of domestic abuse, criminal sexual conduct, or harassment and fear(s) imminent violence against the individual or authorized occupant if the individual remains (the individuals remain) in the leased premises.

2. *(Waxa aan aaminsanahay in _____ (magaca dhibanaha (dhibanayaasha) uu yahay dhibane/dhibanayaal dagaal qoyska dhex mara, fal dambiyeed la xiriira galmoodka, ama qashqashaad iyo cabsi degdeg ah ku sugan yihiin qofkan iyo dadka la nool (haddii qofku sii deganaado) dhismaha ay kula jiraan heshiiska kirada.)*

3. I understand that the person(s) listed above may use this document as a basis for gaining a release from the lease.

3. *(Waxa aan fahamsanahay in qofka (dadka) kor ku xusan ay qoraalkan u adeegsan karaan sabab ay kaga baxaan heshiiska kirada).*

I attest that the foregoing is true and correct.

(Waxa aan ka marag kacayaa in hadalka meeshan ku qoran uu yahay mid sax ah oo run ah.)

(Printed name of qualified third party)
(Magaca sadexan ee qoloda sadexaad ee sharcigu u ogol yahay)

(Signature of qualified third party)
(Saxiixa sadexan ee qoloda sadexaad ee sharcigu u ogol yahay)

(Business address and business telephone)
(Cinwaanka shaqada iyo telefoonka shaqada)

(Date) (Taariikh)

[Keep a copy of this letter and the document you attached for your records]

[Nuqul ka reebo warqadda iyo qoraalada ku lifaaqan oo meeldhigo]